

Xaggee Loo Aadaa Daryeel

Wac daryeel bixiyahaaga koowaad, xitaa saacadaha shaqada ka dib, haddii aadan hubin halka aad aadayso.



XAFIISKA DARYEELAHA KOOWAAD

\$\$\$\$\$\$\$\$

Meesha loo aado maaraynta daryeelkaaga caafimaad. Daryeel bixiyahaaga koowaad ayaa sida ugu fiican u yaqaan taariikhdaada caafimaad.

FURAN: Maalmaha shaqada. Xafiisyada qaarkood ayaa leh ballamo hore, kuwa goor dambe ah iyo kuwa ah Sabti iyo Axadda. Bixiyeyaashu had iyo jeer ayaa la wici karaa.

U FIICAN:

- Baaritaanka jireed ee sannadlaha ah
- Baaritaanada joogtada ah
- Tallaallada
- Murgacashada iyo muruq go'a
- Xaaladaha/cudurrada daba-dheer
- Dib u buuxsashada daawada
- Qabowga iyo hargabka
- Walwalka iyo niyad jabka



RUGTA CAAFIMAADKA EE LA TAGO BALLAN LA'AAN

\$\$\$\$\$\$\$\$

Daaweynta cudurrada fudud iyo dhaawacyada markii aadan sugi karin inaad ballan qabsato.

FURAN: Badanaa maalin kasta, aroortii ilaa fiidka hore.

U FIICAN:

- Qabowga iyo hargabka
- Jeexitaanada yaryar iyo gubashooyinka
- Murgacashada iyo muruq go'a



XARUNTA DARYEELKA DEGDEGA AH

\$\$\$\$\$\$\$\$

Daryeelka degdegga ah ee loogu talagalay xaaladaha/cudurrada aan halis gelinayn noloshu. Celceliska wakhtiyada sugitaanka oo ka gaaban kuwa qolka gurmada.

FURAN: Badanaa maalin kasta, aroortii ilaa fiidka hore.

U FIICAN:

- Cudurka Neefta
- Jeexitaanada u baahan tolmo
- Lafaha jabay
- Jugta maskaxeed
- Mataga iyo shubanka



QOLKA GURMADKA

\$\$\$\$\$\$\$\$

Daryeelka degdegga ah ee loogu talagalay xaaladaha/cudurrada halis geliyo nafta, oo ay ku jiraan wadne istaagga iyo istaroogga.

FURAN: Had iyo jeer.

U FIICAN:

- Qandho hayso cunug ka yar 3 bilood
- Laab xanuunka
- Neefsashada oo yaraato
- Kabuubyo lama filaan ah, daciifnimo ama hadalka oo dhib ah
- Calool xanuun daran
- Qufaca ama dhiig matagida
- Dhiig-bax aan xakamayn lahayn
- Dhibaataada caafimaadka maskaxda